

Aabbe Ayaa Si Wacan ugu Og

**Aabbeyaal, Abtiyaal/Adeerro,
Aabbeyaal Aan Dhalin ee
Hooyooyin-kood Qaba,
Awoowayaal...**



Dhammaantiin meel gaar ah ayaad ku leedihiin nolosha caruurtiina! Caruurta haysata rag ku lug leh nolol

maalmeed-koodga waxay noqdaan kuwo aad u habaysan oo si fiican ugu qalabaysan guul. Muhiim ayaad tahay! Danayntaada iyo jacaylkaagu waxay samayn doonaan faraq weyn oo muhiim ah.

La Ciyaar Carruurtaada. Ha noqoto inaad hal xiraale iyo xujo, ciyaar banooni, safar gaaban aad darjiinada isu raacdaan oo ku sii raaxaysataan ama inaad xirfado kale isla sammaysaan, carruurta way jecel yihiin marka aad wakhti u qaadato inaad la ciyaarto.

Ad-adeyg muuji, hase ahaatee debacsanaan/naxariis lahow. Nidaam iyo xadduud u sammee hubina in carruurtaada fahmaan sababta ay tahay inay raacaan nidaamkas. Ka yeel mid jooqta ah.

Noqo Qof ay Carruurtaadu la hadli karaan. Miyey karaan caruurtaadu in ay kula fadhiistaan oo ay kaala sheekaystaan rajooyinkooda, cabsidooda, riyoooyinkooda/waxa ay maanka ku hayaan iyo arrimaha xariirka sida saaxiibtinimo? U furfurnoow iyaguna way kuu furfurnaana. La wadaag fikirradaada, dareenadaada iyo khibradahaaga. Hadba sida ay korayaan/weynaanayaan waxay xasuusan doonaan sheekooyinkaas gaarka ah.

Talooyinkan ku saabsan waalidnimada waxay idinkaga timid Hay'adda Adeegyada Carruurta ee Degmada Franklin (Franklin County Children Services). Halkaasoo aan u ola-olayno amniga, xasiloonaada iyo faya-qabka canug kasta. childrenservices.franklincountyohio.gov 614-275-2523